

Yoolgaar iyo imtixaanno guud ee fasallada 3-aad

- Warbixin ku socota adigaagii waalidka ah



Billowga teeramka dayrta 2008 ayaa waxaa fasallada 3aad lagu soo rogay yoolgaar guud ee maadooyinka Iswiidhishka, Iswiidhishka heer af-labaad iyo Xisaabta. Waxaana maadooyinka imtixaanno guud marka ugu horeysa loo gali doona gu'ga 2009. Ardaydu waxay dhigataa mid uun ka mid ah maadooyinka Iswiidhishka ama Iswiidhishka heer af-labaad. Labada midka uu ardaygu dhiganayana waxay masalan ku xiran tahay haddii uu ardaygu leeyahay af-hooyo aan iswiidhish ahayn.

Maxaa fasallada 3-aad loogu soo rogay yoolgaar iyo imtixaanno guud?

Fasallada 3-aad waxaa yoolgaarka iyo imtixaannada guud loogu soo rogay si tacaliinta waddanka oo dhan ay isku mid u noqoto. Isku mid marka la leeyahay waxaa looga jeedaa in ardayda oo dhami ay ugu yaraan xaq u yeeshaan inay aqoontoodu gaarto heerka ugu hooseeya ee shardiga ah. Waa muhiim in sida ugu dhaqsiiyaha badan looga war helo haddii ardayga ay ku adkaato inuu gaaro yoolka aqooneed si iskuulku iyo waalidku si wadajir ah iskula eegi lahaayeen taageerada gaarka ah ee uu ardaygu u baahan karo.

Yoolgaarka iyo imtixaannada guud waa qeyb ka mid ah hab-hoggaanka iskuulka

Maanta waxaa jira laba nooc oo yoolgaar ah: *yoolgaar qorsheysan* iyo *yoolgaarid*. Yoolgaarka qorsheysan waa midka hoggaamiya qorsheynta waxbarashada ee quseeya fasallada oo dhan.

Yoolgaaridduna waa heer aqooneed ee iskuulku uu u shaqeynayo inay ardayda oo dhan fursad u helaan inay gaaraan. Yoolgaarka lagu soo rogay fasallada 3-aad waa mid la mid ah kan fasallada 5-aad iyo 9-aad ay horey u lahaayeen. In kasta oo ardayda badideed ay awooddo, horumarkeeda aqooneedna uu dhaafi doono yoolka balse wuxuu yoolgaarku qeexayaa aqoonta ugu yar ee loogu talagalay in ardaydu ay garato saddexda fasal ee iskuulka ugu horreeya ka dib.

Imtixaannada guud ee maadooyink a Iswiidhishka, Iswiidhishka heer af-labaad iyo Xisaabta ee lagu soo rogay fasallada 3-aad waxay macalinka u noqonayaan wuxuu tiigsado marka uu qiimeynayo in ardaygu uu gaaray yoolka iyo in kale.

Ulajeeddada laga leeyahay imtixaannada guud waa:

- inay kasbaan in ardaydu si ka badan sidii hore ay u gaarto yoolka la caymay,
- in lagu ogaado ardayga waxa uu ku wanaagsan yahay iyo waxa uu daciifka ku yahay,
- inay tiir u noqdaan qiimeyn siman oo caddaalad ku dhisan.

Yoolgaarka iyo imtixaannada maxay ilmaheyga micno u leeyihiin?

Yoolgaarka fasalka 3-aad wuxuu aasaas u noqonayaa tixraaca aqoonta ardayga ee loogu talagalay in si joogto ah loo fuliyo laga billaabo fasalka 1-aad. Tixraaca joogtada ah ee la billaabo markuu ardaygu dugsiga billaabayo waa hab looga hortago in ardayga ay ku adkaato inuu gaaro yoolka. Haddii tixraaca lagu ogaado in ardayga uu dhibaato kala kulmi doono inuu gaaro yoolka wuxuu xaq u leeyahay taageero gaar ah.

Teeramka gu'ga waxay ardayda dhigata fasalka 3-aad aqoontooda ku muujin doontaa imtixaan guud. Iskuulka ayaa go'aaminaya goorta bilaha maarso – may 2009 la qaadi doono qeybaha kala duwan ee imtixaanka. Imtixaannada guud waxay u sameysan yihiin hab saamaxaya inay imtixaannadu qeyb dabiici ah ka noqdaan waxbarashada.

Imtixaanka wuxuu tiir u yahay qiimeynta ah in heerka aqoonta ardayga ay gaarsiisan tahay heerka ugu yaraan loogu talagalay inay ardaydu gaarto dabayaaqada sanadka saddexaad ee ay iskuulka dhiganayaan.

Sidee bay yoolgaarka iyo imtixaannada waalid ahaan ii saameynayaan?

Yoolgaarka guud ee xilli hore iskuulka lagu soo rogo wuxuu waalidka u fududeynayaa inay la socdaan ilmaha horumarkiisa aqooneed. Taasina waxay sidoo kale waalidka u sahleysaa inay ilmahooda u radiyaan xaqa ay u leeyihiin taageerada gaarka ah haddii laga cabsiqabo in ilmuha uusan gaareyn yoolka guud ee waxbarasho ee u yaala fasalka 3-aad.

Macalinka isagoo tiigsanaya natiijada imtixaanka guud ayaa wuxuu qiimeyn guud ku sameynayaa aqoonta ardayga wuxuuna u barbardhigayaa yoolgaarka. Qiimeynta waxaa lagu soo koobayaa qoraal qeexaya aqoonta ardayga. Qoraalkuna wuxuu anbaqaad wanaagsan u noqonayaa wadhadalka waalidka iyo iskuulka.